

Baabuurta Rakaabku wadaago

- Gaaadiid rakaab oo haysta ruqsad dhigeysa in la wadaago raacitaankooda.
- Waa inuu leeyahay taarikada Baabuurta la wadaago (Rideshare, RS) oo ay soo saartay WA State Department of Licensing.

Xeerarka Maamulka Washington (Washington Administrative Codes, WAC) iyo Xeerarka Dib loo Egay ee Washington (Revised Code of Washington, RCW) ee loogu talagalay baabuurka laga dhaafo boonada

468-270-030 [Qeexitaanada](#)

468-270-085 [Waa maxay baabuurta laga dhaafay bixinta lacagaha dhamaan xarumaha lacagaha ee wadooyinka gobolka Washington lagu qaado?](#)

468-270-095 [Shuruudaha lagu dalbanayo khidmada dhaafka baabuurta la wadaago ee dhamaan xarumaha la iskaga qaado khidmada boonada ee wadooyinka gobolka Washington?](#)

468-305-210 [Waa la iskaga baahan yahay gaariga u qalma si uu u codsado dhaafitaanka?](#)

Shuruudaha iyo Xeerarka Koontada Dhaafitaanka Khidmada Boonada ee Dhaafitaanada Boonada

Codsiga Dhaafitaanka Khidmada Wadada waa in la buuxiyo, la diro, ayna ansixiso WSDOT/Good To Go! kahor aan la helin dhaafitaanada khidmada wadada ee loogu talagalay baabuurta.

- Dhaafitaanka khidmada wadada waa toos waa inay ansixitaan WSDOT/Good To Go! si wadada baabuurku u maro khidmad la'aan.
- Khidmada wadada ee ka horeeyay kahor ansixinta waxaa masuul ka ah mulkiilaha gaariga/hay'ada meeshana lagama saari doono ama lacagtoodna lama soo celin doono.
- Baabuurta waa inay haystaan dhaafitaanka khidmada wadada waqtiga boonada la siinaayo si ay u helaan dhaafitaanka khidmada wadada ee safarkooda.

Codsiyada dhaafitaanka khidmada wadada waa in dib loosoo diraa waana inay si sanadle ah u ansixiyaan WSDOT/Good To Go! si baabuurta u sii helaan dhaafitaanka khidmada wadada.

- Baabuurtu waxay dhumintaa karaan oggolaanshaha dhaafitaanka khidmada wadada waxaana laga saari karaa oggolaanshaha dhaafitaanka khidmada wadada haddii codsiga aan lasoo gudbin kadib marka ay codsadaan WSDOT/Good To Go!.

Washington State Department of Transportation (WSDOT) waxay diidi kartaa codsiga haddii ururku uusan isticmaalin baabuurta uusana buuxin shuruudaha lagu xusay xeerarka WACS iyo RCW.

Dhamaan baabuurta u qalma dhaafitaanka khidmada wadada ee soo gudbiyay codsiga waa inay si rasmi ah diiwaangashan yihiin, amaah uu ku bixiyay, ururka waana in lagu sameeyaa qiimeyn baabuur/iyo mid lagu eegaayo ruqsada:

- Baabuur kasta oo aan si rasmi ah u diiwaangashaneyn, amaah uusan ku bixin, ururku waxaa laga saari karaa oggolaanshaha dhaafitaanka khidmada wadada.
- WSDOT/Good To Go! waxay codsan kartaa nuqulka diiwaanka gaariga ama amaahda gaari kasta oo lagu liis gareeyay koontada dhaafitaanka khidmada wadada.
- Baabuurta iyo kaararka dhaafitaanka khidmada wadada waxaa lagu sameeyaa qiimeynada kaarka/gaariga lagu sameeyo. Baabuurta iyo kaararka la oggaado inaysan u hogaansamin sharciyada waxaa laga saari karaa oggolaanshaha dhaafitaanka khidmada wadada.
- Baabuurta aan si buuxda ugu jirin oggolaanshaha dhaafitaanka khidmada wadada iyo/ama boonoyinka caymisku lagu daboolo kahor inta aysan ka helin ansixinta dhaafitaanka khidmada WSDOT/Good To Go! lama oggola ururka ayaana masuul ka noqon doona bixinta kharashaadka kaararka.

Kaararka waa inuu iibsaday lana siiyay gaari kasta.

- Kaararka lama wadaagi karo ama looma sii wareejin karo baabuur kale.
- Haddii gaari la ogaado inuu isticmaalaayo kaar uusan lahayn, baabuurka waxaa laga saari doonaa oggolaanshaha dhaafitaanka khidmada wadada.

Gaari kasta oo laga saaro oggolaanshaha dhaafitaanka khidmada wadada sababo la xariira inuusan sharciga u hogaansamin wuxuu dib u codsan karaa dhaafitaanka khidmada marka uu buuxiyo dhamaan shuruudaha dhaafitaanka khidmada wadada.

Marka baabuurta loo oggolaado dhaafitaanka khidmada wadada, WSDOT/Good To Go! ayaa furi doonaa koontada dhaafitaanka khidmada wadada oo aan wax lacag ah looga qaadeyn.

Koontada waxa kaliya lagu dalacayaa kharashka kaararka (iyo cashuurta iibka gobolka Washington) ee lagu iibsaday baabuurta haysta dhaafitaanka khidmada wadada. Dadka akoonada haysta ayaa masuul ka ah joogteynta iyo ku cusbooneysiinta koontadooda onlaynka ah barta www.MyGoodToGo.com. Dadka akoonada haysta waxay aqbalaan inay haystaan koontada dhaafitaanka khidmada wadada asagoo raacaya arrimahaan soo socda kana dheeraanaya khidmadaha wado marka:

1. Ku darista dhaafitaanka khidmada wadada baabuurta iyo kaararka koontada isla markiiba marka gaariga la helo.
2. Macaamiisha haysta akoonada laga dhaafay khidmada wadada ee helay kharashka kaarka Pay By Mail sababo la xariira inaysan gaariga ku darin koontada waa inay bixiyaan kharash kasta oo taagan kahor inta aan gaariga lagu darin koontada dhaafitaanka khidmada wadada.
3. Ka saarista baabuurta laga dhaafay khidmada wadada iyo kaararka koontada isla markiiba kadib iibka ama burburka gaariga.
4. Iibsashada kaararka iyo diiwaangelinta mid baabuur kasta ayadoo la raacaayo tilmaamaha diiwaangelinta kaarka.
5. Joogteynta xogta xiriirada dadka oggolaanshaha haysta iyo dhammaan macluumaadka koontada hadda.

Sida Codsiga Dhaafitaanka Khidmada Wadada loogu soo gudbiyo *Good To Go!*

Buuxinta iyo Soo gudbinta Codsiga Dhaafitaanka Khidmada Wadada/liiska kaarka ee loo gudbiyo *Good To Go!*

Buuxi Codsiga Dhaafitaanka Khidmada Wadada ee kujira bogga xigga oo kusoo dir faylka bartaan oonleenka ah www.MyGoodToGo.com. Hoos ka eeg faahfaahino ku saabsan sida loo diro oonleen Codsiga Dhaafitaanka Khidmada Wadada ee la buuxiyay.

Codsiyada Dhaafitaanka Khidmada Wadada ee cusub ee aan lahayn koontada Dhaafitaanka Khidmada Wadada:

1. Booqo webseedkeena ah www.MyGoodToGo.com si aad kiis cusub oga furto oonleenka aadna u gudbis codsigaaga aad buuxisay.
2. Guji batoonka “La soo Xiriir (Contact Us)” ee ku yaala qaybta kore ee bogga koowaad.
3. Qaybta hoos ku dhaadhacda ka dooro: “**Su'aalaha aan la xariirin koontada ama si aad u bixiso falcelin (For Non-account related questions or to provide feedback).**”
4. Foomka “**Codsiga guud (General Inquiry)**”, buuxi meelaha muhiimka ah: Magaca, iimaylka, taleefoon lambarka, ciwaanka, Lambarka Aqoonsiga Macmiilka, Lambarka Bayaanka, Lambarka Ruqsada Taarikada. (Haddii aadan haysan Lambarka Aqoonsiga Macmiilka, Lambarka Bayaanka, iyo/ama Lambarka Ruqsada Taarikada, geli lambar hal god leh si aad usii socoto).
5. Godka “**Faallada**”, nooca “**Codsiga Dhaafitaanka Khidmada Wadada**” iyo macluumaad kasta oo kale oo khuseeya.
6. Guji batoonka “**Halkaan Ku lifaaq (Attach File)**” ee hoose foomka “**Codsiga Guud (General Inquiry)**” iyo kusoo lifaaq Codsigaaga Dhaafitaanka Khidmada Wadada.
7. Guji batoonka “**Dir (Submit)**” oo qor lambarka kiiska ee tixraac ahaan lagu siiyay.
8. Marka aad furto kiiska, waxaan kula soo xiriiri doonaa shan maalmood oo kuwa shaqada ah gudahood.

Hadaad kamid tahay Dadka hadda haysta koontada Dhaafitaanka khidmada gaadiidka gal akoonkaaga:

1. Booqo webseedkeena ah www.MyGoodToGo.com si aad kiis cusub oga furto oonleenka aadna u gudbis codsigaaga aad buuxisay.
2. Shaashada kobaad, guji batoonka **Gal barta (Log In)** ee ku yaala qaybta midig ee kore oo gal koontadaada.
3. Dhaashboodhka akoonkaaga marka aad gasho, Guji badhanka “**Nala soo Xiriir (Contact Us)**”.
4. Dooro “**Su'aalaha aan la xariirin koontada ama si aad u bixiso falcelin.**”
5. Qaybta faallada, nooca “**Codsiga Ka Dhaafitaanka Khidmada Wadada**” iyo macluumaad kasta oo kale oo khuseeya.
6. Guji batoonka “**Ku lifaaq (Attach)**” ee hoose foomka “**Su'aasha Guud (General Inquiry)**” iyo kusoo lifaaq Codsigaaga Ka Dhaafitaanka Khidmada Wadada.
7. Guji batoonka dir oo qor lambarka kiiska ee tixraac ahaan lagu siiyay.
8. Marka aad furto kiiska, waxaan akhriin doonaa codsigaaga waxaana kusoo diri doonaa iimayl dabagal ah muddo shan maalmood oo ah kuwa shaqada gudahood.

Si aad u eegto xaalada kiiska kuu furan:

- Booqo batoonka “**Nala soo xariir (Contact Us)**” ee ku yaala www.MyGoodToGo.com kadibna dooro “**Horey ma u haysatay # kiis?**” Kadibna guji “**Eeg Xaalada (Check the Status).**”
- Geli “**Lambarka Kiiska (Case #)**” iyo “**Ciwaanka Iimaylka**”, kadibna “**Eeg Kiiska (View Case).**”

Marka aan helno Codsigaaga Dhaafitaanka Khidmada Wadada ee Oonleenka ah, waxaan:

1. Kasoo jawaabi doonaa kiiskaaga anagoo adeegsaneyna fariin web si aan u xaqiijino inaan codsigaaga helnay.
2. Eegi doonaa codsigaaga waana aqbali doonaa ama waan diidi doonaa dhaafitaanka khidmada.
3. Haddii aan ansixino, waxaan kuu furi doonaa koontada Ka Dhaafitaanka Khidmada oo kharash la'aan ah, ilaa inaad haysato maahee koontada hadda jira.
4. Haddii aan diidno, waxaan bixin doonaa sharaxaad ku saabsan sababta dhaafitaanka khidmada loo diiday.

QAYBTA 1: MACLUUMAADKA HAY'ADA EE LOO BAAHAN YAHAY

Ma qabtaa Su'aalo ku saabsan nidaamka codsiga ka dhaaftaanka khidmada wadada? Fadlan wac 1-866-936-8246 oo codso inaad la hadasho Khabiiir qaabilsan Dhaaftaanka Khidmada Wadada.

- Hay'ad Dawladeed: Magaalada Degmada Gobalka Dawlada Dhexe Lambarka Aqoonsiga Dhaaftaanka Canshurta Iibabka: _____
- Hay'ad Gaar loo leeyahay (Aan dawli ahayn)

Lambar Koontada Hadda Jira: _____

MAGACA HAY'ADA: _____	WAAAXDA HAY'ADA: _____
CIWAANKA DEEGAANKA: _____	MAGAALADA: _____ GOBALKA: _____
KODHKA BOOSTADA: _____	MAGAALADA: _____ GOBALKA: _____
CIWAANKA ALAABAHA LAGU DIRO: _____	MAGAALADA: _____ GOBALKA: _____
KODHKA BOOSTADA: _____	IIMAYLKA: _____
LAMBARKA TALEFOONKA: _____ LAYN LAYNKA _____	IIMAYLKA: _____

XIRIIRKA KOOBAAD:	MAGACA SADEXAAD: _____
MAGACA KOOBAAD: _____	IIMAYLKA: _____
LAMBARKA TALEFOONKA: _____ LAYN LAYNKA _____	IIMAYLKA: _____

XIRIIRKA DHEERAADKA AH #1:	MAGACA SADEXAAD: _____
MAGACA KOOBAAD: _____	IIMAYLKA: _____
LAMBARKA TALEFOONKA: _____ LAYN LAYNKA _____	IIMAYLKA: _____

LAMBARKA 2 AAD EE QOFKA LABAAD EE LALA XARIIRAAYO:	MAGACA SADEXAAD: _____
MAGACA KOOBAAD: _____	IIMAYLKA: _____
LAMBARKA TALEFOONKA: _____ LAYN LAYNKA _____	IIMAYLKA: _____

LAMBARKA AQOONSIGA SHAKHSI AHAANEED (PERSONAL IDENTIFICATION NUMBER, PIN) DADKA AKOONADA CUSUB HAYSTA OO KALIYA: Fadlan bixi lambarka aqoonsiga shakhsi ahaaneed ee (PIN) afarta-god leh si aad u gasho koontadaada onlaynka ah www.MyGoodToGo.com iyo si aad u isticmaasho nidaamka talefoonka tooska ah.

Biinka _____ (Fadlan diiwaankaaga ku qoro biinka)

QAYBTA 2 AAD: MACLUUMAADKA GAARIGA

- Tilmaamaha maareynta koontada waxaad heli doonaa marka lagu oggolaado dhaaftaanka khidmada wadada ee WSDOT/Good To Go! (Fadlan tirtir safka tusaalaha ah ee ka muuqda hoos kahor inta aadan soo dirin codsigaan.)

Good To Go! Lambarka Boonada Wadada	Ruqsada Taarikada Gobalka	Ruqsada Taarikada Dalka	Lambarka Ruqsada Taarikada	Lambarka Taarikada Baabuurta	Shirkada Sameysay Gaariga	Nooca Gaariga	Sanadka la sameeyay Gaariga	Midabka Gaariga	Magaca loo yaqaan <small>Lambarka boonada lasoo jeediyyay in si fudud loogu aqoonsado boonada ku diiwaangashan gaariga dhaaftaanka loo sameeyay</small>
(Tusaale ahaan 77 1234567890)	Washington	Maraykan	Lambarka Ruqsada Taarikada # (License Plate Number, LPN)	Lambarka Ruqsada Taarikada # (License Plate Number, LPN)	Dodge	Nooca Gaariga Charger	2024	Madaw	77 1234567890

Fiiro Gaar ah oo Muhiim ah: Haddii aad codsanayso wax ka badan 10 gaari, fadlan abuur oo gaari kasta si gaar ah ugu soo dir faylka excel soona raaci codsigaaga. Fadlan ogsoonow in liiska kaarka/gaariga in lagu soo diray jadwalka kor ka muuqda ee Qaybta 2:

QAYBTA 3: AQBALITAANKA SHURUUDAHA IYO XEERARKA

Marka aad buuxiso aadna soo dirto codsigaan, waxaad aqbalaysaa Shuruudaha iyo Xeerarka Koontada Ka Dhaaftaanka Khidmada Wadada.

1. Hoos marka aan saxiixo, waxaan akhriyay, oo aan fahmay, aana aqbalay inaan u hogaansamo Shuruudaha iyo Xeerarka Koontada Dhaaftaanka Khidmada Wadada ee WSDOT/Good To Go!
2. Waxaan aqbalay inaan masuul ka ahayn maareynta akoonkayga onleenka ah ee www.MyGoodToGo.com si aan u cusbooneysiyo xogihii ugu dambeeyay ee kaarkayga iyo baabuurta ku jira koontada hadda.
3. Waxaan fahamsanahay in haddii aanan joogtayn baabuurta iyo kaararka kujira koontadayda, inaan heli karo kharashaad aana masuul ka noqon doono bixinta kharashka kaararkaas ku qoran.
4. Waxaan xaqiijiyay in macluumaadka lagu bixiyay codsigaan uu yahay mid sax ah oo hadda jira. Dhamaan baabuurta iyo kaararka lagu daro akoonkaan waa inay buuxiyaan shuruudaha dhaaftaanka khidmada wadada.

SAXEEXA OGOLAANSHAHA AYAAN LOO BAAHAN YAHAY _____ TAARIKHDA _____

Kusoo dir codsiga aad buuxisay iyo dukumiinti kasta oo dheeraad ah bartaan onleenka www.MyGoodToGo.com.

Eeg qaybta "Sida loogu diro codsiga Dhaaftaanka Khidmada Wadada *Good To Go!*" si aad u hesho hagid dheeraad ah oo ku saabsan sida loo diro codsiga.

/// ISTICMAALKA SHAQAALAHA GUDAHA OO KALIYA /// SAXEEXA ANSIXINTA OGOLAANSHAHA _____ TAARIKHDA _____

Ogaysiiska Title VI ee Dadwaynaha

Waa xeerarka siyaasada Washington State Department of Transportation (WSDOT) si ay u xaqiijiso inaan qofna, iyadoo loo eegayo isirka, midabka, wadanka u dhalashada, sida ku xusan Title VI ee Xeerka Xuquuqda Madaniga ah ee 1964 (Civil Rights Act of 1964), laga saarayo ka qaybgalka, loo diido dheefaha, ama si kale loogu takooro mid kamid ah barnaamijyadeeda iyo hawlaheeda. Qof kasta oo aaminsan in lagu xadgudbay ilaalinta xuquuqdiisa/eeda Title VI, wuxuu u cabasho ka xaraysan karaa Xafiiska Sinaanta iyo Xuquuqda Madaniga ah (Office of Equity and Civil Rights, OECR) ee WSDOT. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan nidaamka cabashada Title VI iyo/ama macluumaadka ku saabsan waajibaadyadayada ka hortaga takoorka, fadlan kala xiriir Iskuduwaha Title VI ee OECR (360) 705-7090.

Macluumaadka Xeerka Dadka Naafada ee Maraykanka u Dhashay (Americans with Disabilities Act, ADA)

Agabkan waxaa lagu heli karaa hab ka duwan adiga oo iimayl ugu soo diraya Xafiiska Sinaanta iyo Xuquuqda Madaniga ah wsdotada@wsdot.wa.gov ama adoo wacaya khadka lacag la'aan ah, 855-362-4ADA(4232). Dadka dhegaha la' ama maqalkoodu ku adag yahay waxay samayn karaan codsi iyagoo ka wacaya Gudbinta Gobolka Washington 711.